اغتنام مواسم الطاعات والخيرات

Ka faa'idaysashada xilliyada daacooyinka iyo khayraadka

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(وَسَارِعُوا إِلَى مَغْفِرَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا السَّمَاوَاتُ وَالْأَرْضُ أُعِدَّتْ لِلْمُتَّقِينَ * الَّذِينَ يُنفِقُونَ فِي السَّرَّاءِ وَالضَّرَّاءِ وَالْكَاظِمِينَ الْغَيْظَ وَالْعَافِينَ عَنِ النَّاسِ وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ)

(Una deg daga Dambi dhaafka rabbigiina iyo Janno Ballaarkeedu yahay cirarka iyo Dhulka oo loo darbay kuwa dhawrsada * Ee ah kuwa wax bixiya Waqtiga Ladnaanta iyo Dhibkaba, ee cabburiya carada ee iska Cafiya Dadka, Allana waa Jecel yahay Samafalayaasha)

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Alle wuxuu ku gaar yeelay maalmaha sanadka xilliyo oo xasanaadka la laballaabayo, khayraadkana ay

badanayaan, darajoojinkana kor loo qaadayo, sii loo jeclaysiin lahaa addoomaha Alle inay Alle u dhowaadaan, oo xaggiisa aadaan, qofka caqliga leh waa kan ka faa'idaysto xilliyadan oo niyadda dar Alle u baraxtira, oo isu dhiga naxariista iyo barakooyinka, wuxuu leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(إِنَّ لِرَبِّكُمْ عَزَّ وَجَلَّ فِي أَيَّامِ دَهْرِكُمْ نَفَحَاتٍ، فَتَعَرَّضُوا لَهَا ، لَعَلَّ أَحَدَكُمْ أَنْ تُصِيبَهُ مِنْهَا نَفْحَةٌ لَا يَشْقَى بَعْدَهَا أَبَدًا)

(**Rabbigiina – cazza wajalla – wuxuu ku leeyahay maalmaha waqtigiina barakooyin ee u banbaxa, waxaa laga yaabaa midkiina inay soo gaarto barako oo kaddibna waligiisa uusan hoogi doonin**).

waxaan shaki ku jirin inaan ku jirno maalmahan xilli ka mid ah xIlliyada kan ugu ajar badan, oo ugu qiima badan, Alle wuxuu ka dhigay abaalka camalka suuban mid aad uga badan camalka xilliyada kale, waa maalmo sharaf badan, waa waqti aad u weyn, oo Ilaahay kor u qaaday nabigana caddeeyay fadliga qiimaha ay leeyihiin waxaa ka mid ah:

* In Ilaahay ku dhaartay wuxuuna yiri:

(وَالْفَجْرِ* وَلَيَالٍ عَشْرٍ * والشفع والوتر)

(**Waxaan ku dhaartay Waabariga * Iyo Habenanada Tobanka ah (Carafo) * iyo Tirada siman iyo tan is dheer**) Siday qabaan culimada tafsiirka badankooda habeennada tobanka waxaa laga wadaa tobanka ugu horreeya dilxija, Allana kuma dhaarto waxaan weynayn, ku dhaarashada waa qiimeyn iyo weyneyn iyo baraarujin iyo caddeynta fadligooda iyo ahamiyadooda.

fadligooda waxaa ka mid ah inay yihiin maalmaha la og yahay oo Alle ka hadlay oo yiri:

(**وَيَذْكُرُوا اسْمَ اللَّهِ فِي أَيَّامٍ مَعْلُومَاتٍ عَلَى مَا رَزَقَهُمْ مِنْ بَهِيمَةِ الْأَنْعَامِ**)

(**oo ay xusaan Magaca Alle Maalmo la Yaqaan, waxa Alle ku Arsaaqay oo ah Xayawaanka nicmoolayda**), waa maalmo qofka muslinka ah ugu soo kulmaya gudashada cibaadooyinka waaweyn sida salaadda iyo sadaqada iyo soonka iyo xajka, taasna maalmaha kale kuma suurtowdo.

waxaa ka mid ah fadligooda: inay yihiin maalmaha Alle loogu jecel badan yahay, camalka suubanna loogu jecel badan yahay Alle xagiisa maalmaha kale, waa xilli laga faa'ideysto, waa waddo lagu badbaado, waa goob khayr loogu tartamo, wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - :

(مَا مِنْ أَيَّامٍ الْعَمَلُ الصَّالِحُ فِيهَا أَحَبُّ إِلَى اللَّهِ مِنْ هَذِهِ الْأَيَّامِ) يَعْنِي أَيَّامَ الْعَشْرِ ، قَالُوا: يَا رَسُولَ اللَّهِ ، وَلَا الْجِهَادُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ؟ قَالَ: (وَلَا الْجِهَادُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ، إِلَّا رَجُلٌ خَرَجَ بِنَفْسِهِ وَمَالِهِ ، فَلَمْ يَرْجِعْ مِنْ ذَلِكَ بِشَيْءٍ)

(**Maalmo ma jiraan oo camalka suuban loogu jecel yahay xagga Alle oo maalmahan ka fiican, wuxuu ka wadaa maalmaha tobanka, waxay dhaheen: rasuulkii Allow xataa jihaadka dar Alle? Wuxuu yiri: (xataa jihaadka dar Alle, qof mooyee oo naftiisa iyo maalkiisa lasoo baxay oo waxna aan lasoo laabanin**), Sidaa darteed waxaa ku habboon qof kaste muslin ah inuu ka faa'idaysto fadligan weyn, iyo abaalkan weyn oo Ilaahay ugu dhowaado daacooyinka kala duwan iyo noocyada cibaadooyinka.

Camalka loogu jecel yahay oo addoonka rabbigiisa ugu dhowaado maalmahan waa xajka guriga Alle ee xumarada leh qofka arrinkaas awoodo, wuxuu leeyahay Alle:

(الْحَجُّ أَشْهُرٌ مَعْلُومَاتٌ فَمَنْ فَرَضَ فِيهِنَّ الْحَجَّ فَلَا رَفَثَ وَلَا فُسُوقَ وَلَا جِدَالَ فِي الْحَجِّ)

(**Xajka waa Bilo la yaqaan, ee ruuxii gudagala bilahaas Xajka, afxumo iyo fisqi iyo muran ma jiro Xajka dhexdiisa**)

Xajka waa tiirka shanaad tiirarka islaamka ka mid ah, arrinka isaguu ku dhammeystirmaa, dambigana waa lagu dhaafaa, dartiisa ayaa addoonka dhalasho cusub loogu qoraa, nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu leeyahay:

(مَنْ حَجَّ ، فَلَمْ يَرْفُثْ، وَلَمْ يَفْسُقْ ، رَجَعَ كَيَوْمِ وَلَدَتْهُ أُمُّهُ).

(**Qofka xajiyo oo aan afxumo ku kicin fisqina sameynin wuxuu ku noqonayaa sida maalinta hooyadii ku dhashay oo kale**)

Xajka waa munaasabad weyn oo laga barto wanaagga iyo akhlaaqda sare, qofka muslinka wuxuu ka barbaarayaa cabsida Alle iyo inuu ku koontaroolo naftiisa waxa ay jeceshay iyo shahwooyinkeeda, iyo inuu akhlaaqda tan fiican qaato xagga wax huridda oo aan ahayn nafjeclaysiga, kaaftoonaan iyo dhowrsasho oo aan ahayn tuugsi iyo isdulleyn, sidoo kale qofka muslinka ah wuxuu ka baranayaa habaysnaan xagga oraahda iyo falka, iyo toosnaan, xaajiga dhinaca xajkiisa waxaa laga rabaa inuu fuliyo wixii islaamka ugu yeeray oo akhlaaq iyo qiyam ah, siduu xaajiga uga soo baxo dugsiga xajka iyagoo ay dhaboobeen waxa ku sugan xajka oo akhlaaq iyo dhaqan ah.

Waxaan adkeynaynaa cibaadada xajka inay tahay dhanbaal ku socda koonka oo dhan, xajka waa nabadgelyo dhammaantiisa iyo amaan, xaajiga ma doodo, ugaar ma kiciyo mana racdeysto mana dilo wuxuu leeyahay Alle:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لا تَقْتُلُوا الصَّيْدَ وَأَنْتُمْ حُرُمٌ)

(**Kuwa Xaqa Rumeeyow ha Dilina Ugaarta idinkoo Xarman**)

Nabadgelinta kuma koobna aadanaha iyo xayawaanka keliya, ee waxaa soo galaya dhirta, xaajiga xataa waxaa la amray inuu nabadgeliyo dhirta, wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(إن هذا البلد حرّمه الله تعالى لا يُعْضَدُ شوْكُه [أي لا يُقطع] ، ولا يُنفَّرُ صَيدُه ، ولا يَلتقط لُقطتَه إلا مَن عَرَّفها)

(**Baladkan Ilaahay ayaa xurmad siiyay qodaxdiisa lama gooyo, ugaartiisana lama racdeysto, baadidiisa lama qaato qofka baahinaya mooyee**).

Waxaan shaki ku jirin inay taas u tahay muslinka tababbar say uga nabadgalaan dhibkiisa dadka iyo geedaha iyo dhagaxa markuu kasoo laabto xajka, wuxuu

noo sheegay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - muslinka dhabta inuu yahay kan dadka oo dhan ay ka nabadgalaan carrabkiisa iyo gacantiisa, wuxuu ku yiri khudbaddii sagootiska:

(أَلَا أُخْبِرُكُمْ بِالْمُؤْمِنِ ؟ مَنْ أَمِنَهُ النّاسُ عَلَى أَمْوَالِهِمْ وَأَنْفُسِهِمْ، وَالْمُسْلِمُ: مَنْ سَلِمَ النّاسُ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ، وَالْمُجَاهِدُ: مَنْ جَاهَدَ نَفْسَهُ فِي طَاعَةِ اللَّهِ، وَالْمُهَاجِرُ: مَنْ هَجَرَ الْخَطَايَا وَالذّنُوبَ)

(**Ma idin sheegaa mu'minka? Waa qofka dadka hantidooda iyo naftooda u nabadgaliya, muslinka: waa midka ay dadka ka nabadgalaan carrabkiisa iyo gacantiisa, mujaahidkana : waa kan kula jihaado naftiisa daacada Ilaahay, muhaajirkana: waa kan ka taga qaladaadka iyo dambiyada**), camalka wanaagsan waxaa ka mid ah soonka oo ay habboon tahay inuu addoonka Ilaahay ugu dhowaado maalmahaan, soonka wuxuu ka mid yahay daacooyinka midka ugu fadli badan, waxa Alle loogu dhowaado kan ugu weyn, Ilaahay naftiisa ayuu u tiiriyay qiimihiisa dartii, wuxuu ku yiri xadiis qudsi:

(كُلُّ عَمَلِ ابْنِ آدَمَ لَهُ ، إِلَّا الصِّيَامَ ، فَإِنَّهُ لِي ، وَأَنَا أَجْزِي بِهِ)

(**Camal kaste aadanaha isagaa iska leh waxaan ahayn soonka, anaa iska leh anaana ka abaalmarinaya**), wuxuu yiri rasuulka:

(مَنْ صَامَ يَوْمًا فِي سَبِيلِ اللَّهِ ، بَعَّدَ اللَّهُ وَجْهَهُ عَنِ النَّارِ سَبْعِينَ خَرِيفًا)

(**Qofka hal maalin dar Alle u sooma wuxuu ka fogeynayaa Ilaahay wejigiisa naarta toddobaatan sano**)

waxaa habboon qofka muslinka inuu soomo maalmaha sagaalka dilxija intuu ka karo, soonkooda wuxuu ka mid yahay camalka loogu jecel yahay Ilaahay agtiisa, gaar ahaan soonka maalinta Carafo qof aan xajka ku sugneyn, nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu ku gaaryeelay soonka maalintaas wuxuu yiri:

(صِيَامُ يَوْمِ عَرَفَةَ أَحْتَسِبُ عَلَى اللَّهِ أَنْ يُكَفِّرَ السَّنَةَ الَّتِي قَبْلَهُ وَالسَّنَةَ الَّتِي بَعْدَهُ)

(**Soonka maalinta Carafo waxaan ka rajeynayaa Alle inuu ii dembidhaafo sanadka lasoo dhaafay iyo kan soo socda**)

maalinta Carafo waxay ka mid tahay maalmaha Alle oo lasoo xaadiro oo Alle addoomihiisa lasoo aado naxariis iyo dambidhaaf iyo naarta inuu ka xoreeyo, waa

maalin ducooyinka la aqbalo, qaladaadka la dhaafo, oo Ilaahay ugu faano dadka dhulka jooga kuwa cirka jooga, wuxuu leeyahay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(مَا مِنْ يَوْمٍ أَكْثَرَ مِنْ أَنْ يُعْتِقَ اللهُ فِيهِ عَبْدًا مِنَ النَّارِ مِنْ يَوْمِ عَرَفَةَ ، وَإِنَّهُ لَيَدْنُو ، ثُمَّ يُبَاهِي بِهِمِ الْمَلَائِكَةَ)

(**Maalin ma jirto oo Ilaahay addoonka naarta ka xoreynayo oo ka badan maalinta Carafo, wuu soo dhowaanayaa malaa'igta ayuu ugu faanayaa**) waa maalinta Ilaahay diinta dhammeystiray nimcadana taamyeelay, waxaa laga wariyay Cumar bin Alkhadaab – Ilaahay raalli haka noqdee -: in nin yahuudi ah ku yiri : mu'miniinta amiirkoodiyow aayad kitaabkiina ku sugan aad akhrinaysaan annaga yahuudda hadday nagu soo degi lahayd maalintaas ciid ayaan ka dhigan lahayn, wuxuu yiri: aayaddee? Wuxuu yiri:

(الْيَوْمَ أَكْمَلْتُ لَكُمْ دِينَكُمْ وَأَتْمَمْتُ عَلَيْكُمْ نِعْمَتِي وَرَضِيتُ لَكُمُ الْإِسْلَامَ دِينًا)

(**Maantaan idiin dhammeystiray Diintiinna waxaanna idiin taamyeelay Korkiinna Nicmadayda**) wuxuu yiri: Cumar (waan ogaanay maalintaas iyo meesha ay rasuulka kaga soo degatay, asoo taagan Carafo oona ay tahay maalin jimco.

Sidoo kale waxaa sunno ah qofka muslinka inuu badiyo maalmahan xuska Alle, xuska waa nolosha quluubta, waxuu keenaa xasillooni, wuxuu leeyahay Alle:

(الَّذِينَ آمَنُوا وَتَطْمَئِنُّ قُلُوبُهُمْ بِذِكْرِ اللَّهِ أَلَا بِذِكْرِ اللَّهِ تَطْمَئِنُّ الْقُلُوبُ)

(**Ee ah kuwa rumeeyay Xaqa kuna xasishay Quluubtoodu xuska Alle, xuska Alle ayayna ku xasishaa Quluubtu**), wuxuu leeyahay nabigeena:

(مَا مِنْ أَيَّامٍ أَعْظَمُ عِنْدَ اللهِ ، وَلاَ أَحَبُّ إِلَيْهِ مِنَ الْعَمَلِ فِيهِنَّ مِنْ هَذِهِ الأَيَّامِ الْعَشْرِ، فَأَكْثِرُوا فِيهِنَّ مِنَ التَّهْلِيلِ، وَالتَّكْبِيرِ وَالتَّحْمِيدِ)

(**Maalmo ma jiraan oo ka weyn xagga Alle oona loogu camal jecel badan yahay maalmahaan tobanka ah, ee badiya tahliisha iyo takbiirta iyo mahadda Alle**)

Sayidkeena Cumar wuxuu ku takbiirsan jiray teendhadiisa oo ku taallay Mino dadka masjidka joogo way maqli jireen wayna takbiirsan jireen, dadka suuqa joogana way takbiirsan jireen ilaa iyo Mino la lulato takbiir, Ibnu Cumarna mino ayuu ku takbiirsan jiray maalmahaas salaadaha kaddib iyo jiifkiisa iyo fadhigiisa iyo socodkiisa, qofka muslinka ah waxaa laga rabaa inuu ku dhawaaqo takbiirta maalmahaan asoo muujinaya

weynida Ilaahay, wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(أَلَا أُخْبِرُكُمْ بِخَيْرِ أَعمَالِكُمْ، وَأَرْفَعِهَا فِي دَرَجَاتِكُمْ، وَأَزْكَاهَا عِنْدَ مَلِيكِكُمْ، وَخَيْرٍ لَكُمْ مِنْ إِعْطَاءِ الذَّهَبِ وَالْوَرِقِ، وَخَيْرٍ لَكُمْ مِنْ أَنْ تَلْقَوْا عَدُوَّكُمْ فَتَضْرِبُوا أَعْنَاقَهُمْ، وَيَضْرِبُوا أَعْنَاقَكُمْ؟ قَالُوا: بَلَى، قَالَ: ذِكْرُ اللَّهِ تَعَالَى)

(**Ma idin sheegaa camalkiina kan ugu khayrka badan ugu sarreynta badan darajada ugu fiican xagga rabbigiina, idinkana khayr badan siismada dahabka iyo qalinka kana khayr badan inaad cadowgiina la kulantaan oo qoortooda aad ka dhufataan iyaguna qoortiina ay idinka dhuftaan?,**) waxay dhaheen: haa, wuxuu yiri: (**waa xuska Alle**).

Waxaa laga wariyay Mucaad Ibnu Jabal inuu yiri:

(مَا عَمِلَ ابْنُ آدَمَ مِنْ عَمَلٍ أَنْجَى لَهُ مِنْ عَذَابِ اللَّهِ، مِنْ ذِكْرِ اللَّهِ (عز وجل)).

(**Aadane ma qabto camal oo ugu badbaado badan cadaabka Ilaahay xuska Alle**)

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena Muxamed inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Walaalaha islaamka ahow:

Camalka weyn waxaa ka mid ah oo addoonka Ilaahay ugu dhowaado maalmahaan udxiyada, waxay ka mid tahay shacaacirta Ilaahay, waxay astaan u tahay diinta nabi ibraahiim, waxayna daliil u tahay sunnada nabi muxamed - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -, Alle wuxuu leeyahay :

(ذَلِكَ وَمَنْ يُعَظِّمْ شَعَائِرَ اللَّهِ فَإِنَّهَا مِنْ تَقْوَى الْقُلُوبِ)

(**Waa Saas Ruuxii wayneeya Amarada Alle (Sharcigiisa) taasi waa dhawrsashada Quluubta**), marka la weydiiyay nabiga: maxay tahay udxiyada? wuxuu yiri: (**waa sunnada aabbihiina Ibaarhiim**) wuxuu yiri nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(ما عَمِلَ آدَمِيٌّ مِنْ عَمَلٍ يَوْمَ النَّحْرِ أحَبَّ إلى اللهِ (عز وجل) مِنْ إهْراقِ الدَّمِ، وإنَّها لَتأْتِي يَوْمَ القِيامةِ بِقُرُونِها وأشْعارِها وأظْلافِها، وإنَّ الدَّمَ لَيَقَعُ مِن اللَّهِ بِمَكانٍ قَبْلَ أنْ يَقَعَ مِنَ الأرْضِ فطِيبُوا بِها نَفْسًا)

(**ma qabto aadane camalka maalinta gowraca (xajka) oo loogu jecel badan yahay xagga Alle daadinta dhiigga, udxiyada maalinta qiyaame waxay la imaanaysaa geesaheeda iyo timaheeda iyo qoobabkeeda, dhiiggana meel weyn ayuu kaga dhacaa xagga Alle intuusan dhulka ku dhicin, ee naftiina haku faraxdo**) Udxiyada waxay ka mid tahay qaababka istaakuleynta bulshada oo keenaysa kalgacal iyo isu naxariisasho iyo isku xirnaanta bulshada, Markuu ku arkay nabiga dadka dhibaato wuxuu ku yiri:

: (مَنْ ضَحَّى مِنْكُمْ فَلَا يُصْبِحَنَّ بَعْدَ ثَالِثَةٍ ، وَبَقِيَ فِي بَيْتِهِ مِنْهُ شَيْءٌ) ، فَلَمَّا كَانَ الْعَامُ الْمُقْبِلُ ، قَالُوا : يَا رَسُولَ اللَّهِ نَفْعَلُ كَمَا فَعَلْنَا عَامَ الْمَاضِي؟ ، قَالَ : (كُلُوا ، وَأَطْعِمُوا ، وَادَّخِرُوا ، فَإِنَّ ذَلِكَ الْعَامَ كَانَ بِالنَّاسِ جَهْدٌ فَأَرَدْتُ أَنْ تُعِينُوا فِيهَا)

(**Qofkii udxiyo qalo yuuna waabariisanin maalinta seddexaad asoo wax kasoo haray guriga u yaalla, marka sanadka xiga waxay dhaheen**: rasuulkii allow miyaan sameynaa sidaan sameynay sanadkii tagay? wuxuu yiri: (**cuna quudiya dhigta, sanadkaas dadka**

dhibaato ayaa hasatay waxaan rabay inaad u kaalmaysaan)

Haddii barwaaqo ay jirto waxaa lagu camalfalaa oraahda rasuulka: (**cuna sadaqaysta dhigta**) haddii dadka uu dhib haysto ama baahi ama rafaad waxaa lagu camalfalaa oraahdiisa: (**qofkii udxiyo qalo yuuna waabariisanin maalinta seddexaad asoo wax kasoo haray guriga u yaalla**), Udxiyada siday ugu ansaxayso gowricidda waxay ku ansaxaysaa iibsashada qiimaha loogu talaggalay, gaar ahaan qofkaan heli karin inuu u qeybiyo sida la rabay, taasoo ay ku gaari karto nidaamka qiimaha udxiyada dadka mutaysanaya, waxayna siyaadinaysaa waxtarka udxiyada iyo abaalkeeda isla markaas, sidoo kale waxay ku gaaraysaa dadka mutaysanaya iyagoo sharaf iyo karaamo leh.

maxaa ka fiican qofka hantiilaha oo awooda inuu isku darsado labada arrimood inuu udxiyada gowraco si reerkiisa uu ugu deeqo iyo inuu qiimaheeda bixiyo siduu dadka danta yar u deeqo meelaha ugu faqriga badan, Sidoo kale waxaa ku habboon qofka muslinka ah inuu badiyo wajiyada khayrka oo dadka wax u taraya, waa inuu badiyaa sadaqada siduu u farxad galiyo dadka saboolka ah iyo dad baahan, Alle wuxuu ku boorriyay addoomihiisa waxbixinta wuxuu yiri:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُواْ أَنفِقُواْ مِمَّا رَزَقْنَاكُم مِّن قَبْلِ أَن يَأْتِيَ يَوْمٌ لاَّ بَيْعٌ فِيهِ وَلاَ خُلَّةٌ وَلاَ شَفَاعَةٌ وَالْكَافِرُونَ هُمُ الظَّالِمُونَ)

(**Kuwa (xaqa) rumeeyow nafaqeeya (bixiya) waxaan idinku arsaaqnay qaarkood kahor intaysan imaanin maalin (Qiyaamada) oon gadasho jirin iyo saaxiibtinimo iyo shafeeco (midna) Gaaladuna iyaga unbaa daalimiin ah**), xadiiska sharafta badan waxaa kusoo arooray:

(مَا نَقصَ مالٌ مِن صَدَقةٍ)

(Sadaqo hanti waxba kama dhinto)

Maxaa inooga baahi badan istaakuleynta iyo isu naxariisashada iyo inaan dareenno dadka kale, annagoo ku dhaqmayno oraahda nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(المُسْلِمُ أَخُو المُسْلِمِ ؛ لاَ يَظْلِمُهُ ، وَلاَ يُسْلِمُهُ ، وَمَنْ كَانَ فِي حَاجَةِ أَخِيهِ كَانَ اللَّهُ فِي حَاجَتِهِ ، وَمَنْ فَرَّجَ عَنْ مُسْلِمٍ كُرْبَةً فَرَّجَ اللَّهُ عَنْهُ كُرْبَةً مِنْ كُرُبَاتِ يَوْمِ القِيَامَةِ ، وَمَنْ سَتَرَ مُسْلِمًا سَتَرَهُ اللَّهُ يَوْمَ القِيَامَة)

(**Muslinka waa muslinka kale walaalkii, ma dulmiyo cadowna uma dhiibo, qofka danta walaakiisa ka shaqeeyo Ilaahay ayaa dantiisa u fulinayo, qofka ka feydo muslin kurbo Ilaahay wuxuu ka feydayaa kurbo**

ka mid ah kurbooyinka maalinta qiyaame, qofka muslin asturo Ilaahay maalinta qiyaame ayuu asturayaa)

wuxuu yiri rasuulka:

(عَلَى كُلِّ مُسْلِمٍ صَدَقَةٌ ، فَقَالُوا : يَا نَبِيَّ اللَّهِ ، فَمَنْ لَمْ يَجِدْ ؟ قَالَ : يَعْمَلُ بِيَدِهِ، فَيَنْفَعُ نَفْسَهُ وَيَتَصَدَّقُ ، قَالُوا : فَإِنْ لَمْ يَجِدْ ؟ قَالَ : يُعِينُ ذَا الحَاجَةِ المَلْهُوفَ ، قَالُوا : فَإِنْ لَمْ يَجِدْ ؟ قَالَ : فَلْيَعْمَلْ بِالْمَعْرُوفِ ، وَلْيُمْسِكْ عَنِ الشَّرِّ ، فَإِنَّهَا لَهُ صَدَقَةٌ)

(**Qof kaste muslin ah sadaqo ayaa laga rabaa**), waxay dhaheen: rasuulkii allow qofkaan helin? Wuxuu yiri: **(gacantiisa ayuu ku shaqaysanayaa naftiisa ayuuna anfacayaa wax buuna sadaqaysanayaa**) waxay dhaheen: hadduusan helin? Wuxuu yiri: (**wuxuu u kaalmaynayaa midka baahan oo dibban**) waxay dhaheen: hadduusan helin? wuxuu yiri: **wanaag ha sameeyo shartana haka haro sadaqay u tahay**).

Ilaahayow nagu caawi xuskaaga iyo mahdintaada iyo wanaagga cibaadadaada